

Adeegyada Soo gudbinta ee loogu talagalay Qoysaska ay U joogaan Carruurta yaryar



ama wac
207-287-3991

Barnaamijka Nafaqada ee WIC (WIC Nutrition Program)

WIC waxay u adeegtaa haweenayda uurka leh, haweenka naas-nuujiya, iyo carruurta jira ilaa da'da 5 sano, ayna ku jiraan carruurta dawladu gacanta ku hayso. WIC waa daryeel nafaqo oo dhamaystiran wuxuuna baxshaa cuntooyin Caafimaad leh, waxbarashada nafaqada, taageerada naas-nuujinta iyo u gudbinta adeegyada kale.



ama wac
877-770-8883

Adeegyada Hormarinta Carruurta/Caawimaada Dhallaanka (Child Development Services/Early Intervention)

Adeegyada Kobaca Carruurta/ Nidaamka Wax qabadka Dhallaanka waa Qaybaha Waxbarashada Heerka dhexe ee bixisa Wax-ka-qabashada Dhallaanka (dhalashada ilaa labo sano jir) iyo Waxbarashada Dawlada oo Bilaash ah ee Ku haboon Ardayda (ee da'aha sadex ilaa shan sano) ayadoo ay kormeerayso Waaxda Waxbarashada ee Maine.



ama wac
800-698-3624

Carruurta Qaba Baahiyaha Gaarka ah ee Daryeelka Caafimaadka (Children with Special Health Care Needs - CSHN)

Laanta Carruurta Qaba Baahiyaha Gaarka ah ee Daryeelka caafimaadka (CSHN) waxay la shaqaysaa qoysaska carruurta qaba baahiyaha gaarka ah ee daryeelka caafimaadka ee ka yar da'da 22 sano. CSHN ayaa ku hagi karta qoysaska iyo ururada helitaanka khayraadka ugu habboon ee baahiyaha ilmahooda. Shaqaalaha ayaa ku hagi kara qoysaska nidaamyada balaaran ee caafimaadka, ayagoo ku xiraaya daryeelka gaarsiinaaya natiijada ugu wanaagsan ee bukaanka.



ama wac
1-855-797-4357

Caymiska Caafimaadka ee Maine (Health Coverage for Maine)

Caymiska Caafimaadka ee Maine (CoverME.gov) ayaa bixinaysa xog ku saabsan dookhyada caymiska caafimaadka ee bilaashka ah ama kharashka yar ee qoysaska Maine. Waxaad sidoo kale helaysaa macluumaadka ururada maxaliga ah ee kaa caawin kara fahanka dookhyadaada caymiska iyo buuxinta codsiga.



Qorshaha Daryeelka Badqabka (Plan of Safe Care - POSC)

Qorshaha Daryeelka Badqabka ee Maine ayaa lagu abuuray iskaashi u dhexeeya adeeg bixiyaha daryeelka caafimaadka ama adeegyada bulshada, hooyada iyo/ama daryeela kale, ayadoo lagu aqoonsanaayo awoodaha iyo baahiyaha qoyska, ilaha iyo tallaabooyinka faa'iidada leh si qaabka ugu habboon looga taageero dhallaanka iyo qoysaska la kulmay maandooriyaasha. Qorshaha Daryeelka Badqabka waxaa badanaa ku jira adeegyada gudbinta ama siinta xogta xariirka qoysaska si ay ayagu u raadraacaan.



ama wac
207-441-5852

Barnaamijyada Head Start/Early Head Start

Head Start waxay bixisaa waxbarashada caruurnimada hore ee carruurta yaryar oo qoysaskoodu buuxiyeen shuruudaha fakhriga ee federaalka. Head Start waa barnaamij federaalku maalgasho, oo balaaran oo barbaarinta waxbarashada ubadka qaabilsan kaasoo loo sameeyay inuu buuxsho baahiyaha dareenka, bulshada, caafimaadka, nafaqada, iyo cilmi nafsiga ee carruurta jira 3 ilaa 5 sano iyo qoysaskooda. Waxay gacan ka gaysanaysaa hormarinta kartida carruurta waxayna kor u qaadaysaa isku filnaanshaha ayadoo la adeegsanaayo qaab isku dhafan oo qoyska diirada saaraaya. Barnaamijka Early Head Start (oo la aasaasay 1994) waa barnaamij iskaashi oo loo sameeyay inuu xal u helo isla baahiyaha carruurta laga bilaabo markay dhashaan ilaa da'da 3, hooyooyinka uurka leh, iyo qoysaskooda.



ama wac 1-888-
644-1130

Nidaamka Soo gudbinta ee Cradle ME (Cradle ME Referral System)

CradleME waxay kaa caawinaysaa inay kugu xirto adeegyada saxda ah ee guriga ku salaysan ee adigga iyo cunugaaga. CradleME waa iskaashi u dhexeeya labo barnaamij: Kalkaalinta Caafimaadka Dadwaynaha iyo Qoysaska Maine.



Qoysaksa Maine (Maine Families)

Maine Families waa shabakad gobalka dhan ah oo ka kooban kooxaha bulshada oo u adeegga baahiyaha haweenayda uurka leh iyo waalidiinta ilmaha dhalay dhawaan. Booqdayaasha daryeelida iyo xirfada ee guriga ayaa kaala shaqayn doona helitaanka xogta iyo ilaha kaa taageeraaya caafimaadka jirka iyo dareenka ee ilmahaaga iyo qoyska dhan.



Kalkaalinta Caafimaadka Dadwaynaha (Public Health Nursing - PHN)

Kalkaalisooyinka Caafimaadka Dadwaynaha ee Maine CDC ayaa baxsha adeegyada Caafimaadka guriga lagu baxsho ee qoysaska. Dhammaan haweenka uurka leh iyo kuwa umusha ah iyo dhammaan ilmaha dhasha iyo dhallaanka ilaa 12 billood ee da'da ayaa heli kara booqashada Kalkaalisada Caafimaadka Dadwaynaha. Haddii aad su'aalo ka qabto caafimaadkaaga ama caafimaadka ilmahagaa, waxaad codsan kartaa kalkaaliso markaad doonto adoo wacaaya lambarka CradleME.

Si aad iskaanka u mariso koodhadhka QR, fur barnaamijka kaamirada ee aaladaada. Ku aadi koodhka QR ee aad doonayso inaad iskaanka mariso. Raadi qaybta ogaysiiska ee korka shaashada - guji si aad u gasho webseedka.

Hay'adan waa bixiyaha fursadda loo siman yahay.

